



Ref: ٠٠٤٤/١/١/B-١٠/١٧

التاريخ Mogadishu, 4th April 2017

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeeddo: Ansixinta Miisaaniyadda 2017

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaan inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray **Ansixinta Miisaaniyadda 2017** oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 1-aad ee Fadhligisii 6-aad ee 3^{da} Abril 2017 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho wuxuu go'aamiyey qodobbada soo socda:

Qodobka 1-aad:

Ayadoo ay goobjoog yihiin 141 Xildhibaan Golaha Kalfadhigiisa 1-aad Kulankiisa 6-aad ee 3.04.2017 wuxuu codeyn wadar oggol ku ansixiyey Miisaaniyadda 2017.

Qodobka 2-aad:

Golaha wuxuu ansixinta miisaaniyadda kor ku xusan ku xadeeyey:

- a) In Xukuumaddu Miisaaniyadda madax-xige kasta ka isticmaali karto saddex (3) bilood keliya, ka bilaabato 1^{da} Abriil kuna eg 30^{ka} Juun 2017.
- b) In Xukuumaddu Miisaaniyadda 2017 oo dib-u-eegis lagu sameeyey ay Golaha horkeento ugu dambeyn 10^{ka} Juun 2017.
- c) Sidoo kale in xukuumaddu Golaha u soo gudbiso Xisaab Xirka Miisaaniyaddii 2015 iyo Miisaaniyaddii 2016 kuwaas oo loo baahan yahay in laysla meeldhigo lana ansixiyo ka hor inta aan la gudagelin ansixinta Miisaaniyadda 2017.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran ayonqaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya



ANSIXINTA MIISAANIYADDA 2017.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

Tirada Xubnaha Codeysay 141: Oggol (141) Diidmo (0) ka aamustay (0)

Taariikh: 3rd Abriil 2017

Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad – Golaha Shacabka

Taariikh: 3rd Abriil 2017

Saxiix: M.ne Cabdiweli Sh. Ibraahim Muudey

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad – Golaha Shacabka

Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 3rd Abriil 2017





Ref: ٥٥٦٤/٧/١/B-10/17 الرقم:

Mogadishu, 1st April 2017 التاريخ

Ku: Wasiirka Maaliyadda
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud ee BFS
L/H. Golaha Shacabka

Ujeeddo: Uyeeris: Horimaad Golaha Shacabka.

M.ne Wasiir,

Tixraaca codsigaada ku xusan warqadaada Lam. MoF/OM/0100/17 ee 01/04/2017 kuna saabsan codsi Ansixinta Miisaaniyadda Sanadka 2017. Waxaan kugu yeerayaa inaad hortimaaddo Kulanka Guud ee Golaha Shacabka Maalinta Isniinta 03/04/2017 saacadda 09:30am (subaxnimo) si aad u soo bandhigto Miisaaniyadda 2017 iyo inaad Xafiiska Xoghayaha Guud ee BFS u soo gudbisaan 300 naqal oo buugaagta Miisaaniyadda ah.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya



MJ/AM



The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

Ref: MoF/OM/01/0917

Taariikh: April 01, 2017

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Ujeedo: Cods Ansixinta Miisaaniyadda Sanadka 2017

Mudane Guddoomiye,

Sidaa aad la socoto waxaa dhawaan la ansixiyey Golaha Wasiirada, ayadoo xilligii Miisaaniyadda Saddex biloodlaha ahayd ay dhamaatay loona baahan yahay in la helo Miisaaniyad lagu shaqeyyo inta ka hadhay sanadka 2017. Intaa waxaa sii dheer in dib u dhac ku yimid xareynta qeybo ka mid ah dakhliga gudaha maadaama shuruucdii lagu qaadi lahaa wali aan laga ansixin Golaha Shacabka.

Hadaba, mudane Guddoomiye waxaa codsanaya in miisaaniyadda 2017 si duuduub ah loo ansixiyo loona dedejiyo ansixinteeda maadaama xukuumaddu iminka waxba kharash gareyn kareyn kana dhamaatay saddex biloodlihi horey loogu ansixiyey.

Dhamaadka bisha june ayaa waxaa ku soo celin doonaa Golaha shacabka ku noqoshada Miisaaniyadda 2017-ka oo dhameystiran si loo waafajiyo mudnaanta iyo siyaasadda xukuumadda cusub islamarkaana Golaha Shacabka waqtii fiican ugu helo qiimeynta iyo falaqeynta miisaaniyadda.

Abdiraxmaan Ducaale Beyle

Wasiirka Maaliyadda





Tixraac: XRW/0.139 /02/2017

Taariikh: 14/02/2017

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeeddo:- Soo Gudbin Miisaaniyadda 2017-ka

Held:
15/2/2017
Golaha Shacabka JFS

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.03.02.17 ee 14/02/2017, kuna saabsanaa ansixinta "Miisaaniyadda 2017" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Haddaba, Mudane Guddoomiye, annaga oo ogsoon in aysan hadda dhisnayn guddi-hoosaadyadii Golaha Shacabka, xerinaynaya muhiimadda Sharci Lr 15 ee Xeerka Maamulka Maaliyadda, waxa ay Wasaaradda iminka ku dhaqanta miisaaniyadda seddex biloodlaha 2017 taasoo ku eg Maarso 2017.

Sidaa awged, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa 'Miisaaniyadda 2017' si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxaan idinka cadsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta "Miisaaniyadda ujeeddada sare ku xusan" maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelinteeda.

Allaa Mahad Leh

Mudane Maxamed Cumar Carta
Ra'iisul Wasaare Ku-xigeeeka Is

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYEED
XAFIISKA GUDDOOMIYA GELID/RECEIVED
TAR: 15/2/2017
TIX: 0.37
SIXIIX: Abdirif



Tixraac: XRW/0-137 /02/2017

Taariikh: 14/02/2017

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirada
Og: Guddoona Golaha Shacabka
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole "Ansixinta Miisaaniyadda 2017-ka"

Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS;

*Helid
15/2/17
JFS*

- Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} (a), (b) & (d) ee Dastuurka Federaalka JFS.
- Markuu arkay: Qodobka 100^{aad} (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS.
- Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay MOF/OM/0032/17 ee 12/02/2017, kuna saab-sanayd soo gudbin Miisaaniyadda 2017 ee Soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
- Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.03.02.17 ee 14/02/2017, kuna saabsan ansixinta "Miisiniyadda 2017", oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.
- Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo u gudbinta Golaha Shacabka Miisaaniyadda 2017.

Wuxuu meel-mariyey:

Oodobka 1^{aad}

Go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.03.02.17 ee 14/02/2017, kuna saabsan ansixinta "Miisiniyadda 2017", oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Oodobka 2^{aad}

In Miisaaniyadda 2017 si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga

Mudane Maxamed Cumar
Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka JFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYEED	
XAFIISKA GUDDOOMIYA	
GELID/RECEIVED	
TAR:	15/2/2017
TIX:	0.30
SIXIIX:	<i>Abdu</i>